# Adeegyada hoyga cusub ee ku meelgaadhka ah ee Benson Polytechnic waa la casriyeeyey.

Ardayda Benson Polytechnic imika waxa ay adeegsanayaan kambaska Marshall ee la casriyeeyey inta kambaskooga taariikhiga ah uu ku jiro hannaan dib u qaabeyn oo saddex sano ah. Dhismuhu waxa uu ka bilaabmay casriyeynta Benson bishii Ogosto, waxyar kadib xafladii dhagax-dhigga. Waxa uu noqon doonaa mashruuca ugu ballaadhan ee Xafiiska Casriyeynta Dugsiyadu qaban doono. Baaxaddiisa iyo baahida loo qabo in uu siiyo adeegyo gaar ah barnaamijyada Benson awgeed, hannaanka dib u qaabayntu waxa uu qaadan doonaa wakhti hal sano ka badan intii ay qaadanayeen mashaariicdii ka horaysay.

Ardayda Benson ma aha kuwii ugu horreeyey ee adeegsada kambaska Marshall. Dhammaan bulshooyinka dugsiyada Franklin, Grant iyo Leodis V McDaniel waxa ay dhammaantood ka dhigteen kambaska hoygooga ku meelgaadhka ah intii dib loo dhisayey dugsiyadaas. Benson, si walba ha noqotee, waxa uu u baahday casriyeyn gaar ah si loo waafajiyo barnaamijyadooda gaarka ah.

Waxa dhawaan la dhammeeyey dhisme ku Ladhan CTE oo cusub oo ku yaal Marshall, waxana uu ka siiyaa hoy Barnaamijka Baabuurta "Automotive Program" hal dhinac oo ka mid ah dhismaha waxana uu boosas ka siiyaa barnaamijka Construction CTE iyo Tech Geo dhinaca kale. Dhismuhu sidoo kale waxa uu daboolay aagagga shaqo ee bannaanka si uu u siiyo boosas dheeraad ah oo lagaga shaqeeyo baabuurta waxana uu siiyaa ardayda dhismaha goob ay ku wadaan mashruucooga Guriga Yar "Tiny House".

Fasalka baabuurta ee ah 5,200 fuudh-laba jibbaaran ee cusub waxa lagu diyaariyey toddoba qaybood oo loogu talagalay ka shaqaynta baabuurta. Laba wiish oo cusub ayaa lagu rakibay, taas oo wadarta ka dhigaysa afar. Laba aag oo fasal ayaa bixiya boos loogu talagalay qolka injiinka yar iyo waxbarashada fool ka foolka ah.

Fasalka dhismaha ee ah 5,000 fuudh-laba jibbaaran ayaa bixiya aag mashruuc ballaadhan oo uu ka mid yahay qolka ku jarista laysarka ee xakameynta tireed ee kombuyuutarka "computer numerical control laser cutter room", oo lagu daray aag shaqo kombuyuutar oo yar iyo boos fasal. Barnaamijka Tech Geo waxa uu dhacaa ku dhawaad 2,300 fuudh laba jibbaaran oo ku taalla cidhifka waqooyi ee dhismaha. Waa markii ugu horaysay ee Tech Geo loo qoondeeyey fasal gaar u ah barnaamijkiisa gaarka ah.

Ladhka CTE waxa sidoo kale loogu talagalay adeegsiga dadyaw kala awood iyo kala doorbiditaan ah "flexibility of use". Marka bulshada Benson ay ku soo noqoto dugsigooda la casriyeeyey, dhismaha Ladhka ah waxa dib loogu qoondeyn doonaa adeegsiyo iyo barnaamijyo kale.

"U wareejinta barnaamijyada CTE ee Benson ee xooggan kambaska Marshall may ahayn hawl fudud; fasalladii soo jireenka ahaa waxa qasab noqotay in loo beddelo goobo lagaga shaqeeyo baabuurta iyo elegtariga, istuudiyeyaasha sawirada, shaybaadhada caafimaadka ilkaha -- sii wad uun," ayuu yidhi Steve Curley, oo ah Macallin Ka Dhiga Digital Media Benson. "Dedaal badan, halabuur iyo sabir ay la yimaadeen shaqaalaha degmada iyo BPHS, iyo dhamaystirka ladhka cusub kadib, waxa aanu u diyaarsanahay inaanu sii wadno himiladayada ah siinta waxbarashada farsamo mihnadeed ardayda Portland."

Casriyeyntu sidoo kale waxa ay ka dhacday gudaha dhismaha Marshall. Kaabayaasha elegtariga ee dhismaha waa la ballaadhiyey si ay u daboolaan baahiyaha barnaamijyada Warshadeynta, Elegtariga, Digital Media iyo Mihnadda Caafimaad. Casriyeyn dheeraad ah ayaa lagu daray cusboonaysiinta fasalka oo loogu talagalay barnaamijyada Caafimaadka Ilkaha, Raadiyaha, Elegtariga iyo Warshadaynta.

"Bulshada, shaqaalaha iyo ardayda Benson Polytechnic waxa ay ku faraxsan yihiin inay joogaan Kambaska Marshall maadaama oo dib loo qaabeeyey dibna loo dhisay si uu hoy ugu noqdo dhammaan barnaamijyada CTE," ayuu yidhi Curtis Wilson, oo ah Maamulaha Benson. "PPS waxa ay sidoo kale awood u yeelatay inay Benson ku taageerto Ladhka CTE ee cusub kaas oo u sahli doona barnaamijyadayada Baabuurta, Dhismaha iyo Tech Geo inay si buuxda u shaqeeyaan."

Dib u qaabaynta kambaska Benson Polytechnic ee taariikhiga ah waxa ku jira dib u qaabayn loogu talagalay dhul gariirka oo lagu samaynayo dhismayaasha muhiimada taariikheed leh iyo casriyeyn caafimaadka iyo ammaanka ah oo dhamaystiran. Waxoogaa waxyaabaha muhiimka ah ee ku jira naqshadda waxa kamid ah goobo waxbarasho iyo goobo shaqo oo CTE ah oo la casriyeeyey, goobo ardaydu isugu yimaadaan/kafateeriya badhtanka ku taalla oo ku xidhiidhsan daarad gudaha ah, iyo dib u qaabayn lagu sameeyey jiimta iyo hoolka qudbadaha. Kambaska dhammaantii waxa la naqshadeeyey iyada oo maskaxda lagu hayo in uu in badan waaro; waxyaabo badan dib ayaa loo adeegsan doonaa, in ka badan 40 geed oo cusub ayaa la beeri doonaa, dab dhaliyaha tamarta qorraxdu waxa uu bixin doonaa ugu yaraan 400 oo kiiloowaad oo tamar la cusboonaysiin karo ah. Wacaasha ka soo korodhay iyo sawirada dhismaha waxa laga heli karaa halkan.

Kambaska cusub waxa sidoo kale ku jiri doona dhisme dhawr dabaq ah oo hoy u noqon doona barnaamijka Wadooyinka Badan ee Qallinjabinta ee PPS "PPS Multiple Pathways to Graduation" (MPG) waxana ku jiri doona xarumo loogu talagalay Isbahayshiga Benson iyo Meek, Dart/Clinton, Daryeelka Ilmaha iyo Adeegyada Dhallinta Waalidka, Adeegyada iyo Barnaamijka Dib u Xidhiidhinta "Alliance at Benson and Meek, DART/Clinton, Teen Parent Childcare and Services, Reconnection Services and Program". Barnaamijka MPG waxa uu ku dedaalayaa in uu siiyo ikhtiyaaro waxbarasheed dhammaan dhallinta kuwaas oo xoojiya, ka qaybgeliya, una diyaariya kulliyadda, tababarka shaqada, iyo muwaadinimada caalamiga ah iyaga oo u adeegaya sidii hormuudka isbeddel waxbarashada manhajeed ah. Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan mashruucan fadlan booqo websaytka mashruuca MPG.

Dhismayaasha Benson iyo Multiple Pathways to Gratuation oo si buuxda loo casriyeeyey waxa loo muddeeyey in dib loo furo dayrta 2024.

--David Mayne, Maareeyaha Xidhiidhada Curaarta